# Qalabka iyo Suuganta Qodaalka

Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'
Mohamoud H. Nugidoon

*Waxaa gacan ka gaystay*

Cali Cumar Xasan

**Xuquuqda qoraalkan oo dhammi waxay u dhawran tahay qoraayada kor ku magacaaban oo laga xidhiidhi karo hal_aqoon@yahoo.com.**

PONTE INVISIBILE

Buug elektrooniggan waxaa daabcay Ponte Invisibile Edizioni, REDSEA-ONLINE.COM Publishing Group
Noofember 2005 – daabaciddii 1aad - Pisa

Taxanaha *Dhaxalreeb*:

[1] Jama Musse Jama, Juun 2005
*Layli Robot: Makiinad iswadda oo ciyaarta Layli Goobalay*.

[2] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' iyo Mohamoud H. Nugidoon, Noofember 2005
*Qalabka iyo Suugaanta Qodaalka*.

Taxanaha *Dhaxalreeb* waa qoraallo aan kalgal sugan lahayn oo sannadkiiba dhowr jeer kasoo baxa degelka redsea-online.com. Waxaa isku dubbarida qoraalladaas Jama Musse Jama, waxaana daabacda shirkadda buugaagta soo saarta ee Ponte Invisibile Ed. ee saldhiggeedu yahay Pisa, Italy.

Bilaash kaga soo rogo degelka www.redsea-online.com/e-books.

# *Qalabka iyo Suuganta Qodaalka*

Waxa soo wada diyaariyey ***Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'***
iyo ***Mohamoud H. Nugidoon***. Waxa kula guusay
oo gacan ka geystey ***Cali Cumar Xasan***

hal_aqoon@yahoo.com




Dadka Soomaaliyeed waxay caan ku yihiin xoolo dhaqasho. Hayeeshee qodaalkana kama taggana. Soomaaliya (koonfurtii hore) waxay caan ku ahayd, haddana ku tahay, beeraha muuska, liinta iyo canbaha. Beerahaasi waa kuwii uu Talyaanigu sameeyey. Kolka la qodayana waxa lagu qodaa qalabyada cusub ee beeraha lagu falo. Dadka Soomaaliyeedse waxay beeran jireen, haddana beertaan, arabikhi (gallay), hadhuudh (masago), qamandi, sarreen iyo sisin. Qalabkay adeegsadaanna waa qalabkii ay carro-edegta madoobi caanka ku ahayd, kuwaasi oo kala ah yaanbo iyo dibi.

**Meerar**

Dad badan oo reer Soomaaliya ah baa weli rumaysan in labada webi dhexdooda mooyee aan meel kale wax laga beerin gaar ahaan Soomaalilaand (woqooyigii hore ee Soomaaliya). Qoraalkan kooban waxaannu, haddaba, ku eegi sida ay dadka reer Soomaalilaand beeraha u qotaan iyo weliba qalabka iyo suugaanta ay adeegsadaan.

Ugu horrayn, reer Soomalilaand beeraleyda waxay u yaqaanniin qodaal. Inkasta oo hadda wax walba dalka laga beero, waagii hore waxa aad loo beeran jirey hadhuudhka iyo arabikhida oo qudha. Yaanbo S/laand lagama adeegsado ee waxa beeraha lagu qodaa qalab lagu xidho dibi. Qalabkaas iyo labada dibi ee lagu xidhaba waxa la yidhaa ***Qindi***. Kolka ay labada dibi iyo qalabku isku xidhan yihiin ***Meerar*** baa la yidhaa. Reerku haddii uu leeyahay dibi qudha iyo qalabkiisa waxa la yidhaa reerku wuxuu leeyahay ***Qar***. Kolka laba reer oo midba qar leeyahay ku heshiiyaan iney isku geysataan labadooda dibi iyo qalabkooda si ay beerta ugu qodataan waxa la yidhaa ***mirmire***. Haddaba reer ka mid ah labadaas reer, kolka uu damco inuu wax ku qoto labadii dibi iyo qalabadoodii laysu geeyey wuxu odhanayaa waa ***mirmirahaygii***; kolkuu ka kale wax ku qodanayana waa ***mirmirihiisii***.




Qalabka qodaalka


Kolka beerta la qodayo waxa lagama maarmaan ah inuu reerka beerleyda ihi haysto qalabka aan soo sheenay. Maalinta taageero hawleed loo hidinayo cid ka tirsan bulshada beeraleyda ah oon awoodin iney keligeed wax qodato, ama goosato, waxa la yidhaa ***balqabasho***. Ujeeddada oo ah in maalin loo ballamo sidii ciddaasi beerta loola qodi lahaa ama loola goyn lahaa. Haddii maalin go'aansado in beerta la qodo waxa marka hore la astaystaa, sida sawirka hoos ku qeexan ku cad, inta maalintaa la qodayo. Si loo garto inta la qodayo waxa la jeexaa laba **faag** oo la kala yidhaa: **faagga bidix** iyo **faagga midig**. Labadaa faagdhexdooda waxa la yidhaa ***booy***. Booygaasi ayaana la shinniyeeyaa ( abuurka lagu shubaa). Kolkaasaa qodidda lagu bilaabaa. Halka ay dibidu ka soo laabmaan ( noqdaan) waxa la yidhaa **Hornog**. Intaan Cagafcagaftu dalkeenna soo gaadhin, ninka beerta qodayaa aroorta hore ayaa isaga iyo dibidiisuba hawsha bilaabi jireen. Maalin badhkeed kolkay ku jiraan ayuu meerarka ka furi jiray dibida si loo aroorsho, loona daaqgeeyo, una nastaan isaga iyo dibiduba. Inta haddaba maalintaa gelinkeeda la qodo **qooddi** baa la yidhaa.

Ninka beer qodatada ah oo ku caan baxay inuu yahay muruq maal, xalaal quute ah ayaa isaga oon marnaba illowsanayn caqiidadiisa islaamnimo, hawshiisa ku bilaaba hees-hawleed Bisinka Eebbe iyo Alla barigiisaba ku bilaabmaysa, waxaanu yidhaa:

*Bismilaahi layeene*
*Bisinkii nin bilaabay*
*Ilaahayna baryaaya*
*balayo uma timaado!*

*Ilaahay idankiisa*
*Arbacuunka Quraanka*
*Alif looxa ku yaala*
*Udgoonow Nabigii iyo*
*Awliyoy na gargaar*

*Horreeey!*




Markale isaga oo dibida la hadlaya wuxu yidhaa**:**

*Ma ku maaweeliyaayoo*
*Madaddaalo nin weyn iyo*
*Maad ma ku mariyaa!*

*Milaygu waa milaygii*
*Rag maleeganayey*
*Naagana mooska hurdeen!*

*Horreeey!*

Isagoo tilmaamaya in, dadkii kale qodaalka ka hor bilaabay, isaga iyo qindigiisuna xasaag yihiin buu yidhaahdaa:

*Labadeennani mooyee*
*Labadeer kale mooyee*
*Rag muraadkii dhamaysay!*

*Horreeey!*

Siduu hawsha ugu jiro ayuu quruxda iyo qaabkay dibidu u qalabaysanyiihiin la ashqaraarayaa oo la dhacaa, markaasuu ammaan oogta ka qaadaa oo uu yidhaa:

*Sida qaalmaha geela*
*Oo qoryo laysugu dhaabay*
*Amba qoor-yar gabadheedoo*
*Qalab aada la saaray*
*Maxaa kaa qalam laynee*
*Qoorta kuu galiyeen?*
*Dhaldhalaalkiyo dhiinka*
*Ma dhiilaad lulateen?*
*Mise waa dhaladkiin*
*dhalanteedna lahayn?*

*Horreeey!*

Markuu arko in dibidii daal wareemay oo tallaabadii iyo tamartiiba soo gabaabsiyeen, ayuu tirtirsiyaa oo dhiiri galiyaa si ay u toosaan oo caajiska isaga duuliyaan:

*Taltalaabsin gabdheedlow*
*Tagoogooyin haldhaalow*
*Taftaa wiilalbaa lehe*
*Iska tiiri xamaanta*

*Haybow hadhkii weeyi*
*Habeen weli weeyi*
*Hawshii dhiman weeyi*
*Hor-horee socod weeyi*
*Hagradaa doqon weeyi*
*Cagta hoosta ka qaad dhehi!*

*Horreeey!*

Isagoo u dardaar warinaya dibida oo u sheegaya inuu daalka iyo dhibtaba la wadaago ayuu markaana yidhaa:

*Sidii naag humbaniyoo*
*Hadhuudhkii ka xumaaday*
*Maxaad ii hadimayneed*
*Hoosta iiga habaari*

*Ma aniga hadhimeeyayoo*
*halkii kaaga dambeeyayoo*
*Hiraabtii dabadeed*
*Hooyaday wax i siisay!*

*Harqoodkaad gilgilayso*
*Hornagaad jabinayso*
*Hawli kuu madhximaysee*
*Iga dayso hantaaqda!*

*Sidii guunyar gabdheedoo*
*Dhulkii guursi ka weyday*
*waan galliin tagyaa iyo*
*is guunguun badnidaa!*

*Horreeey!*

Ninka beerta qodayaa markuu qayrkii u faanayo, ee u sheeganaayo inuu yahay nin balo ka firxatay oo hawl kar ah, kuwa kalena uu ku tilmaamayo inay yihiin wax ma tarayaal aan hawl kar ahayn wuxuu yidhaa:

*Markii reerka la joogooy*
*Marka reerka la joogo*
*Raggu waysku rag uun dheh*
*Marka beerta la joogo*
*Qaarbaa riyo nuug ah*
*Xagga reerka u yaaca!*

*Horreeey!*

Dibida ayuu caanaan waayeel u soo jeedinayaa, iyo sida aanay dibidu marnaba u xasuusnayn beerqodaalka ka hor hawsha ku soo fool leh, markaasuu yidhaa:

*Waadigii cararaayayee*
*Car yay itaaban lahaaye*
*Dulaha caaradiisiyo*
*Baguu caynku ku gooyay!*

*Waadigii salalaayee*
*Sabadaha miranaayee*
*Lo'da suulasha gooyayee*
*Bagood gaajo sureertayoo*
*Sabirkaagu yaraaday!*

*Hadhka ood hurudaaniyo*
*Haddaad hawl yari doontid*
*Igadh haan laga buuxshiyo*
*Maad haween noqotaan!*

*Horreeey!*

Isagoo tusaalaynaya dibida inaan isaga (ninka beerta qodaya) iyo ayagaba dani ugu jirin baashaalka, cidla warwareegga iyo waqti lumiska aan wax tar lahayn, buu yidhaa:

*Lo'da dooxyada daaqda*
*Darandooriga weynle*
*Qoodhu diida ka hayso*
*Waxba kaaga dan maaha!*

*Anna geedka duleedka*
*Haddaanan diin dhiganaynin*
*Daabacaynin Quraanka*
*waxba iiga dan maaha!*

*Haddanan gabgableeyow*
*Guradaada ka yeedhin*
*Waa haddaan gabadhoobayoo*
*gosha lay qabanaayo!*

*Anigu kuu tudhi maayee*
*taladii Rabbigaa iyo*
*Tagooggaaga wax mood*
*Iska tiiri xamaanta!*
*Dhayal kuuma koorayn*
*Bilaashna kuu dhibimaayee*
*Dhulkaan dhuuni ka dooni!*

*Horreeey!*

Markay beertu dhammaad ku dhawdahay, buu hareeraha eegaa oo ku riyaaqaa hawshuu qabtay markaasuu dibidana amaan iyo duco iskugu iidaamaa oo yidhaa:

*Sidii naag dhali weydayoo*
*Dhawaan Eebbe wax siiyayoo*
*Dhabta wiil la haleeshay*
*Dhabankaaga sokeeyiyo*
*Ma afkaan dhunkadaa*

*Kol hadday shinni gaadho*
*Shansho dheerow gammaan iyo*
*Gabadh shaaximan mooyee*
*Shan halaad kuma siisto!*

*Kuwa qaaliyo joogee*
*Qadaw geela ku eega*
*Waay ina quudhsanayaane*
*Way ina quudi hadhaw!*

*Haleelooyinka geela*
*Habeen noolba la maalo*
*Haaneedkaa la baraa*
*Hablo weynta gabowdayna*
*Haasaawa la baraayoo*
*Hoosbaa loola hadlaa*
*Dibigii hooyo wanaagsanna*
*Harqoodkaa la baraa!*

**Horreeey!*

*Horreeey*!

*Dibidaa faaggu la taraaray oo hornagga waydaartay, sidaa awgeed buu laba jeer u baahday inuu horrrey yidhaa.
Markay dibi-ka-furka tahay (casarka) ee uu u sheegaayo dibida inay hawshii gabagabo tahay, mar aan dheerayna qalabka laga furi doono wuxuu ku dhawaaqaa:

*Waa casar gaabanoo*
*Waa cadceed dabadeed*
*Carraabeyna sugaayee*
*Cawlow toosoo ha leexan*
*Ceebtana inaga ilaali!*

*Horreeey!*

Markay maalin shaqadeed gabagabo ku dhawdahay. Beertana faagga casaanku isqabto, aseen xilligii meerarka dibida laga furayay la gaadhin, ayuu dibida wax tarkooda dhaxal galka leh duco ugu mahad celinayaa isagoo leh:

Cagta rays ha la waayin
Carrabka doog ha la waayin
Caadilkii ku abuurayna
Caafimaad ha ka waayin!

Sidii dooni shiraac lahoo
Shimaalkii badda joogta
Shaanshaan garabkeediyo
Sheeddaa laynaga daawan!
Indho cawri yaqaaniyo
Calool goono taqaanna
carrab naada yaqaanna
Caadbaan kaaga hagoogay!

*Horreeey!*

Kolkuu beerta faagga u dambeeya marayo ayuu sheeganayaa daalkiisa, heesta iyo

hawshaba wuxuu ku xidhayaa duco iyo Alla bari, markaasuu odhanayaa:

*Rabbiyow ha ina heerin*
*Ha inna hooda xumaynin*
*Hedelkeenna ha baajin*
*Rabiyow hedelkeenna*
*Hadduudh uudle ka yeel!*

*Rabbiyow tacabkeenna*
*Tabantaabo samaatiyo*
*Talo khayr leh ka yeel*

Heeeeee... heeeeee
yakh ... yakh.... Heeeyn..

N a b a d g a l a.

Marka beerta qodiddeeda la dhammeeyo, haddii aanay beertu guban (xumaan), dhawr maalmood kadib abuurkaa bilaaba inuu soo hufo. Kolkay shinnidu sidaa hufto baa la yidhaa way '**biqishay'**. Haddii ay si fiican u soo baxdo oo ay ciidda wadaqariso '**carraqaris'** baa la yidhaa. Intaa wixii ka danbeeya geedku wuu weynaadaa oo waxa laga dhursugaa inta uu ka dhalayo.

Geedku kolka uu gaadho heerkii uu ku midheysanayey ee uu midho dhalo waxa la yidhaa wuu dhalay. Marka uu firigu curdinka yahay waxa la yidhaa wuu '**dhaysinayaa'**. Marka uu caano geshana **'addar'** buu noqdaa. Kolka madaxa hadhuudhka intiisa hore caddaato inta dambana caanagelis tahay waxa la yidhaa wuu xasiidey.

Shinka hadhuudhku kolkuu go'o wuu bislaaday baa la yidhaa. Kol haddii uu hadhuudhku bislaado waxa xiga ee la qabtaa waa goynta. Meesha madaxa hadhuudhka lagu ururiyo waxa la yidhaa '**uud'**. Ugu dambaynta kolka firiga laga tumo madaxa waa la kala asooraa.

**F.G:** Si uu qoraalkani u noqdo cashar wax laga taransado waxaannu ujeeddooyinka ereyada qalabka ku qeexnay erey-furkan soo socda.

**Erey-furka:**

**Asoor(-ka):** Haadis, kolka la kala saarayo isha iyo midhaha.

**Balqabasho(-da):** Maalinta taageero haw leed loo hidinayo ciddii ka tirsan bulshada beeraleyda ee aan awoodin iney keligood wax qotaan.

**Biqil(-ka):** Kolka shinnidu soo hawrto.

**Biseyl(-ka):** Kolka shinka hadhuudhku go'o ee la goynayo.

**Booy(-ga):** Beerta inta shinniyeysan ee la qodayo.

**Carro-qaris(-ka):** Kolka abuurku soo wada baxo ee ay ciiddu wada qarsoonto.

**Dhays(-ta):** Kolka uu firigu curdinka yahay.

**Digir(-ta):** Qori yar oo loo kala dhexay-siiyo marashida iyo nugida si aanay u leexsamin.

**Faag(-ga):** Soohdinta qodiddu ka bilaabmayso.

**Harqood(-ka):** Qoriga weyn ee labada dibi tunka kaga xidhma ee isu haya dibida iyo qalabka qodaalka.

**Hornog(-ga):** Soohdinta ay dibidu ka soo laabato kolka beerta la qodayo.

**Indhal(-sha):** Xadhigga labada minaaq laysugu xidho.

**Irfi(-ga):** Qoriga ay marashidu ku jirto ama la gesho.

**Jiqirti(-da):** Qori dhuuban oo isu haya irfiga iyo nugida.
**Kooshin(-ka):** Suun isu haya ama laysugu xidho halka ay nugida iyo irfigu iska galaan.

**Kootar(-ka):** Qoriga isu haya harqoodka iyo nugida.

**Marashi(-da):** Middida weyn ee dhulka gasha si ay ciidda u kala jeexo.

**Minaaqyo(-da):** labada qori ee isu haya dibiga iyo harqoodka ee uu qalabka intiisa kale ku sii xidhanyahay.

**Nugi(-da):** Qoriga weyn ee uu irfigu ku xidhanyahay.

**Qaddar(-ka):** Kolka firigu uu caano gesho.

**Shinni(-da) :** Abuur; midhaha la beerayo.

**Suundambeed(-ka):** Suunka isu haya kootarka iyo nugida.

**Xasiidid(-da):** Kolka madaxa hadhuudhka intiisa hore caddaato inta dambana caanagelis tahay.

**Uud(-ka):** Goobta lagu ururiyo madaxa hadhuudhka.